



Lacag siinta saameeynta dhaqaalaha Muxuu ku saabsanyahay?

SAAMEYNTA COVID-19

Fayraska COVID-19 wuxuu waxyeelleeyaa wax ka badan caafimaadkeena. Markay dadku shaqeyn karin, dukaamaysan karin ama sameyn karin ganacsi, waxay dhaawaceysaa dhaqaalaheena oo dhan. Si lagaaga caawiyo in arrimaha wax fudud laga dhigo, Golaha Koongareeska Mareykanka wuxuu meel mariyey sharci la yiraahdo Sharciga CARES Act.

Qayb ka mid ah Sharciga CARES Act waa bixinta \$ 1,200 oo loogu talagalay dadka dakhligoodu ka yar yahay \$ 75,000 sanadkii. Dadka qaar ee dakhligoodu intaas ka sareeyo waxay helayaan lacag sidoo kale (aan ahayn \$ 1,200). Waxa kale oo ku jira \$ 500 qofkasta oo ku tiirsan da'diisu ka yar tahay 17 sano.



Haddii aad qaadato SSI ama SSDI, waxaad heli doontaa \$1200. Masaamayn doonto inaad u qalanto faaidooyinka kale.

Dadka aanan heli doonin lacagtaas waa kuwa:



- Qaata wax ka badan \$99,000 misna aanan reer lahayn
- Kuwa iyaga canshuurta sanadkii hore lagu buuxsaday (tusaale, waalidka ilmo ku buux-sada)
- Aanan lahayn lambarka bulshada oo sax ah
- Oo aanan daganayn United States

Waxa aad ka heli kartaa macluumaad badan oo ku saabsan dadka lacagtaan helaya boga IRS-ta ee lacagaha saameynta dhaqaale: [irs.gov/coronavirus/economic-impact-payment-information-center](https://www.irs.gov/coronavirus/economic-impact-payment-information-center).

Lacagaha dadka qaata daqliga dheeriga ee bulshada (SSI).

Dadka qaata SSI ee aan haysan ilmo aan lacagta helayn uma baahna inay ficil qaadaan si ay u helaan lacag-bixintooda. Si kastaba ha noqotee, kuwa qaata SSI ee leh caruur u qalma lacagta, waxay u baahnaan doonaan inay isticmaalaan boga dadka aanan buuxsan, ee laga helo halkan:

[irs.gov/coronavirus/non-filers-enter-payment-info-here](https://www.irs.gov/coronavirus/non-filers-enter-payment-info-here).



Ka feejignow kuwa isku dayaya inay xadaan macluumaadkaaga shaqsiyadeed iyo lacagtaada.

IRS kuma soo wici doonto, kuu soo diri mayso qoraal, email kuuma soo direeyso kugulama soo xiriireeyso warbaahinta bulshada oo ku weydiisan meeyso macluumaadkaaga akoonka ama bangiga - xitaa wax laxiriira bixinta lacagaha saameynta dhaqaalaha. Iska ilaali emayllada leh lifaaqyada xiriiriyeyaasha sheeganaya inay hayaan macluumaad gaar ah oo ku saabsan bixinta lacagaha ama dib-u-celinta lacagaha. Kuwaa si waa tuugo.